# Heerka 4-aad ee qorsha dib-u-furidda waddanka dib baa loo dhigayaa – heerka saddexaad na wax baa laga beddelayaa

**Kaddib markii ay sidaas ku taliyeen Agaasinta caafimaadka iyo Machadka caafimaadka dadweynaha (FHI) ayay dawladdu go'aan ku gaartay in dib loo dhigo hirgelinta heerka 4-aad ee qorshaha dib-u-furidda waddanka. Heerka 4-aad waxaa loo gudbi karaa ugu horreyn dhammaadka bisha luuliyo ama horraanta bisha ogoosto.**

Sababtu waa shaki laga qabo faafidda cudurka, nooca delta iyo helitaanka tallaalka. Si kastaba ha ahaatee, waxay dawladdu debcinaysaa qaar ka mid ah heerka 3-aad ee qorshaha dib-u-furidda waddanka ee hadda lagu jiro.

– Goorta aan u gudbi karno heerka xiga ee qorshaha dib-u-furiddu waxay ku xiran tahay macluumaadka la hayo ee kuma xirna taariikh. Waxaa jirta khatar loogu jiro in uu nooca delta keeno in cudurku mar afraad dillaaco oo ku dhoco dadka aan tallaalnayn, kuwa halka cirbad qaatay iyo kuwo u nugul haddii uu cudurku ku dhoco. Agaasinka caafimaadka iyo FHI kuma talinayaan in aan hadda u gudubno heerka 4-aad. Taas waannu taageersannahay. Heerka midkan xiga waxaa loo gudbi karaa ugu horreyn dhammaadka bisha luuliyo ama horraanta bisha ogoosto. Xaaladda faafidda cudurka, tirada dadka cudurku ku dhoco, awoodda hay'adaha caafimaadka iyo tirada dadka tallaalan ayay ku xiran tahay goorta aan u gudbi karno heerka 4-aad, ayay tiri raysalwasaare Erna Solberg.

Ingiriiska iyo Israa'iil ayaa ah laba waddan oo lixdaan bilood lagu sheegay in ay guulo gaareen kaddib markii ay dadka u tallaaleen si wanaagsan oo degdeg ah. Si kastaba, nooca delta ayaa keenay in dib loo dhigo dib-u-furiddii Ingiriiska, meesha ay Israa'iil tillaabooyin cusub soo rogtay ayada oo tillaabooyinkii dalkaas intooda badan la qaaday horraantii gu'ga.

– Laga billaabo 18-kii juun waxyaalo badan ayay dawladdu ka debcisay heerka 3-aad. Intii hore in ka badan ayaan hadda safarnaa, dad intii hore ka badanna waan la kulannaa – waxaa loo baahan yahay in aan aragno cawaaqibka debcintaas ka yimaada ka hor intaan dib-u-furis kale la samayn. Sida uu nooca delta ugu faafayo dalalka kale ayaa ah mid welwel miiran, ayuu yiri Bent Høie oo ah wasiirka caafimaadka- iyo daryeelka.

**Wax-ka-beddello lagu sameeyay heerka 3-aad: Qabanqaabo la haysto shahaadada koroonaha**
Laga billaabo saqda dhexe khamiista 8-da luuliyo waxaa la kordhinayaa tirada dadka joogi kara qabanqaabooyinka guud ee la haysto shahaado koroone – irriddana tijaabo laysaga qaadayo.

Tirada dadka joogi kara qabanqaabooyinka dibedda ka dhaca marka ay shahaado haystaan tijaabana laga qaado waxay ahayd 5000 waxaana laga dhigayaa 7000 haddii

ay dhammaan fadhiyaan meelo joogto ah oo loo tilmaamay isla markaana dadka loo kala qaybiyo kooxo joogto ah (tabbeellaha hoose ka eeg faahfaahinta).

Sharuuddii ahayd in miis la fadhiyo si khamri loo iibsado waa sideedii, laakiin qabanqaabooyinbka noocan ah waa laga dhaafayaa shuruuddii ahayd in aan la soo geli karin wixii ka danbeeya saacadda 24.

Dadka difaacan uma baahna in ay ka fogaadaan dadka ay isla socdaan, marka laga reebo kuwa ay isla socdaan ee aan difaacnayn ama ka mid ah kooxaha nugul haddii cudurku ku dhoco.

– Marka aan isticmaalno shahaadada koroonaha waxaa yaraanaya khatarta loogu jiro in cudurku dillaaco. Wax-ka-beddelladaan ayaa fududaynaya in xagaaga hab ammaan ah loo qabto feestooyin iyo qabanqaabooyin, ayay tiri Solberg.

| | *Gudaha* | *Dibedda* |
|---|---|---|
| *Leh meelo joogto ah oo laysu tilmaamay* | Ugu badnaan 3000 oo qof (horey u ahaa 2500 oo qof). Ilaa iyo 500 oo qof kooxdiiba, ugu badnaanna 50 % inta goobtu qaaddo. | Ugu badnaan 7000 oo qofood (horey u ahaa 5000 oo qof). Ilaa iyo 500 oo qof kooxdiiba, ugu badnaanna 50 % inta goobtu qaaddo. |
| *Aan lahayn meelo joogto ah oo laysu tilmaamay* | Ugu badnaan 1500 oo qofood (horey u ahaa 1000 qof). Ilaa iyo 500 oo qof kooxdiiba, ugu badnaanna 50 % inta goobtu qaaddo. | Ugu badnaan 3000 oo qof (horey u ahaa 2000 oo qof). Ilaa iyo 500 oo qof kooxdiiba, ugu badnaanna 50 % inta goobtu qaaddo. |

**Xannaanooyinka carruuraha, SFO iyo iskoollada meelaha cudurku ku badan yahay waa in ay isu diyaariyaan heerka jaallaha ah**

Waxay hadda ka hor dawladdu sheegtay in ay iskoollada iyo xannaanooyinka carruuruhu heerka cagaarka ah isu diyaarin karaan dayrta. Laakiin faafidda nooca delta oo sii kordhaya iyo xaaladda cudurka oo ah mid aan la sii saadaalin karin ayaa laga yaabaa in ay saameeyaan xannaanooyinka carruuraha, SFO iyo iskoollada.

Marka lagu jiro heerka cagaaran dadka kooxo joogta ah looma kala saaro. Sidaas darteed arday iyo macallimiin badan ayaa karantiil geli doona haddii dad cudurka laga helo. Laamaha caafimaadka ayaa sidaas darteed dib u eegaya istaraatiijiyadda TISK ee xannaanooyinka carruuraha iyo iskoollada marka lagu jiro heerka cagaaran. Laakiin ilaa inta ay dib-u-eegistaasi ka dhacayso waa in ay xannaanooyinka carruuraha, iskoollada iyo SFO ee ku yaalla meelaha cudurku ku badan yahay ku tala galaan heerka jaallaha ah. Waxay weliba taasi si gaar ah u khuseysaa xannaanooyinka carruuraha iyo SFO oo la furi doono bisha ogoosto ka hor intaan iskoollada la furin.

**Xeerarka koroonaha ee ciyaartoyda ka yimid waddammada kale**

Wax-ka-beddelis ayay dawladdu ku samaynaysaa xeerarka soo gelidda waddanka oo waxaa xayiraadaha soo gelidda waddanka laga dhaafayaa ciyaartoyda heerka sare ee waddammada kale iyo kaaliyayaasha lagama maarmaanka ah ee safarkooda ku weheliya marka ay Norway soo gelayaan si ay uga qabyqaataan qabanqaabooyin ciyaaro badan oo caalami ah.

**Waxaa kuwaas ka mid ah:**

- Is-reebreebka ciyaaraha OL ee ishockey-ga ragga, 26.-29. ogoosto
- Champions League iyo koobka Yurub ee kubbadda gacanta ee ragga iyo dumarka ee ogoosto
- Is-reebreebka ciyaaraha UEFA Champions League iyo UEFA Conference League ee kubbadda cagta ee ragga iyo dumarka
- Tartammada baaskiilka ee Ladies Tour of Norway ee Viken ka dhacaya, Tour of Norway ee Rogaland ka dhacaya iyo Arctic Race of Norway ee ka dhacaya Troms iyo Finnmark. Kuwani waa qabanqaabooyin caalami ah oo si fiican Norway uga dhaqangalay dhammaantood na dhici doona bisha ogoosto.

Ka-qaybqaatayaasha qabanqaabooyinka isboortiga waa loo oggolaan doonaa in ay waddanka soo galaan, waxaana sidoo kale laga dhaafi doonaa joogista hoteelka karantiilka. Waxaa loo samayn doonaa xeerar karantiil oo ayaga gaar u ah oo la mid ah kuwii hadda ka hor loo sameeyay tartammada isboortiga ee caalamiga ah.

Karantiilka soo gelidda waddanka waxaa lagu qaadan doonaa goob ku habboon. Waa in ay suuraggal tahay in aan dadka kale loo dhowaan, oo la leeyahay qol gooni ah, musqul iyo kushiin gooni ah ama cuntada la isu keenayo.

Waxay dawladdu ku tala jirtaa in xayiraadaha soo gelidda waddanka laga dhaafo ka-qaybqaatayaasha iyo kaaliyayaashooda ciyaaraha adduunka ee lagdanka, ciyaaraha adduunka ee qaadidda culayska iyo ciyaaraha Yurub ee curling-ka kuwaas oo Norway lagu qaban doono bilaha oktoobar iyo nofeembar. Laamaha isboortiga ayaan kala hadli doonnaa sidii xalal wanaagsan loogu heli lahaa xeerarka karantiilka soo gelidda waddanka ee u yaalli doona qabanqaabooyinkaan.